**War** saxaafadeed

# HCAP: Yaraynta wakhtiyada ka rogaal celinta wicitaanada 911

Febraayo 02, 2023 Weydiimaha saxaafadda

## Health Care Action Plan (HCAP), Alberta Health Services waxay bilowday barnaamij cusub oo EMS-811 Shared Response ah si qof kasta oo reer Alberta ah uu u helo heer daryeel oo ku haboon.

Alberta waxay leedahay shaqaalaha gurmadka caafimaadka ee ugu wanaagsan dunida, dowladduna waxay ka shaqayn doontaa in ay u diyaariso taageerada saxda ah si loo xaqiijiyo in dadka reer Alberta ay helaan daryeelka ay u baahan yihiin goorta iyo goobta ay uga baahan yihiin.

Shaqaalaha caafimaadka ee Alberta waa kuwo xirfaddoodu sarrayso waxayna u tababaran yihiin nooc kasta oo xaalad degdeg ah. Shaqadoodu waxay lagama maarmaan u tahay sidii loo xaqiijin lahaa haddii ay jiraan xaaladaha culus in dadka reer Alberta ay helaan daryeel heerkii ugu sareeyay.

Si loo xaqiijiyo in dadka reer Alberta ee u baahan daryeelka degdega ah ay helaan daryeelka sida ugu dhakhsaha badan, saraakiisha xiriirka xaaladaha degdega ah ee EMS waxay hadda si dhow ula shaqaynayaan kooxda loo xilsaaray 811 ayaga oo la shaqaynaya kooxda EMS-811 Shared Response ee cusub. Kooxda Shared Response waxay ka shaqayn doonaan sidii ay wicitaanada aan xaaladaha degdega ahayn ugu hagaajin lahaayeen si toos ah kalkaalisada 811, ayada oo wicitaanada xaaladaha degdega ahna lasii wadi doono in loo diro ambalaas.

Marka dadka reer Alberta ee wacaya 911 lagu xiro EMS, sarkaal qaabilsan xiriirka xaaladaha degdega ah ayaa u xaqiijinaya qofka soo wacaya in caawimaad ay kusoo socoto ayada oo bukaanada loo kala hormarninayo qaab la mid ah qaabka loogu kala hormariyo waaxda gargaarka degdegga ah ee isbitaalka. Marka sarkaalka xiriirka xaaladaha degdega ah uu ku kalsoonyahay in xaaladda bukaanka si wacan wax looga qaban karayo iyadoo heer daryeel caafimaad oo kale la adeegsanayo, wuxuu wicitaanka si toos ah ugu hagaajinayaa kooxda kalkaalisooyinka diiwaangashan ee ku shaqada leh khibraddana u leh ee laga helo 811 asaga oo aan soo wacaha khadka sugitaanka galin. Kalkaalisasada

diiwaangashan waxay sii qiimayn doontaa bukaanka iyo xaaladiisa si ay u ogaato xulashooyinka daryeelka ee ku haboon.

Wicitaanada 911 ee lagu qiimeeyay in ay caafimaad ahaan ku habboon yihiin nidaamka cusub ee shared response ma sugayaan khadka sugitaanka caadiga ah ee 811 waxayna helayaan kalkaaliso loogu tala galay oo diiwaangashan si ay kaalmo u siiso. Dadka soo wacaya waxaa loo sheegayaa waxyaabaha ku saabsan hanaankan, inta lagu gudo jiro caawimada qofkana haddii la ogaado in ambalaas loo baahan yahay, ambalaas ayaa loosoo dirayaa.

Wicitaanada aan xaaladaha degdega ahayn waxay tiro ahaan gaarayaan 10 ilaa 20 boqolkiiba guud ahaan wicitaanada 911, ayada oo ay ku xirantahay goobta. Arrintasi oo micnaheedu yahay in, ayada oo la adeegsanayo EMS-811 Shared Response, ku dhawaad 40,000 oo ah rogaal celin laga rogaal celinayo xaaladaha aan degdega ahayn ayaa la joojin karaa sannad kasta. Qaabkan cusub micnahiisu waa in ambalaasyo dheeraad ah la diyaarin doono si loogu diro goobaha aadka looga baahan yahay ayada oo la xaqiijinayo in dhammaan dadka reer Alberta ay sii helaan heerka ku haboon ee daryeelka ay u baahan yihiin.

## Tallaabooyinka muhiimadda leh ayaa hirgelinayaa si loo yareeyo wakhtiga rogaal celinta ee EMS

Maamulaha AHS ee rasmiga ah waxaa loo xilsaaray afar shaqo oo muhiim ah si sare loogu qaado helitaanka adeegyada caafimaadka ee degdega ah. Arrintas waxaa kamid ah helitaanka qaabab loo isticmaalo gaadiidka kale marka isticmaalka ambalaasta iyo shaqaalaha caafimaadka ee aadka u tababaran aan loo baahnayn. AHS waxay soo saaraysaa codsi ku saabsan muujinta rabitaanka iyo u qalmidda in ay raadsato qaadista xaaladaha aan degdega ahayn ee isbitaalada dhexdooda ah iyo xarumaha daryeelka ee ku yaala agagaarka Calgary iyo Edmonton horraanta Febraayo.

AHS waxay sidoo kale ka shaqaynaysaa dadajinta qaadista ambalaasyada ee ka shaqeeya waaxyaha xaaladaha degdega ah. Taariikhdu markay ahayd Janaayo 5, siyaasad gobolka ee AHS ayaa laga dhaqan galiyay isbitaalada oo dhan, taasoo bixinaysa tilmaamaha iyo hagitaanada lagu fududaynayo wareejinta bukaanada xaaladahoodu caadiga tahay ee aan degdega ahayn taasoo ka imanaysa daryeelka shaqaalaha caafimaadka lana gaynayo waaxda xaaladaha degdega ah iyo kooxaha xarunta daryeelka degdega ah.

## Xaqiiqooyinka kooban

- Shaqaalaha EMS waxay la shaqaynayeen Poison and Drug Information Service (PADIS). Ilaa iyo horraantii 2022, AHS waxay ku guulaysatay inay 400 oo wicitaan oo aan xaalad degdeg ah ahayn wareejiso kuwaas oo qabay su'aalo ku saabsan poison and drugs iyadoo u wareejisay PADIS.
- Kalkaalisooyinka ka diiwaangashan Health Link waxay isticmaalaan qaabka talo bixinta ugu wanaagsan ee shaqada taasoo isticmaasha hagitaanada caddaynta ku salaysan waxayna bixisaa xulashooyin caafimaad oo ammaan ah, bukaankana loogu tala galay kuwaas oo ah bukaanada xaaladda degdega ah ee soo wacay 911.
- AHS waxay dhammaan dadka reer Alberta ee raadinaya talo caafimaad oo aan xaaladaha degdega ahayn ku dhiirigalinaysaa in ay wax ka bartaan xulashooyinkooda daryeelka ee u furan ayaga oo bookhanaya ahs.ca/options. Dhakhaatiirta, farmashiileyaasha ama Health Link ayaa markasta ah kaalmada ugu wanaagsan.

## Macluumaadka la xiriira

- Qorshe Howleedka Healthcare (Healthcare Action Plan)

## Wararka la xiriira

- HCAP: Tallaabada tooska ah ee lagu yaraynayo wakhtiga rogaal celinta ee EMS (Janaayo 16, 2023)
- Qorshe Howleedka Healthcare (Healthcare Action Plan): Wakhtiga rogaal celinta EMS (Diisambar 21, 2022)
- Dib u habaynta AHS si sare loogu qaado daryeelka bukaanka (Noofambar 17, 2022)

## Warbaahinta kala duwan

- Daawo war saxaafadeedka
- Maqal: EMS/ 811 Shared Response - Mock Call
- Maqal: Laga soo xigtay Wasiir Copping
- Maqal: Laga soo xigtay Xoghayaha Baarlamaanka Sigurdson
- Maqal: Laga soo xigtay Patricia Chambers, agaasime sare oo gobolka ah, daryeelka onleenka ah, Alberta Health